Mashruuca hay'adaha wada-hoggaanka ah

**Waaxda Caafimaadka & Adeegyada Aadanaha ee Nebraska**

**Waaxda Waxbarashada ee Nebraska**

P.O. Box 94987
Lincoln, NE 68509-4987
402-471-2471

Nebraska Early Development Network

Babies can't wait

**Nebraska CHILDFIND**

1.888.806.6287

http://edn.ne.gov

**DHAMMAAN DADAALLADA CHILDFIND WAXAA LA MAALGELIYAA IYADOO LOO MARAAYO IDEA QAYBTA C**
BIXINTA DEEQDA #H181A220033

Dib loo eegay Sitembar 2022

# Ma ka walaacsan tahay Caafimaadka ama Koritaanka Ilmaha?



Nebraska Early Development Network

Babies can't wait



Nidaamka Nebraska ee Adeegyada Wax-ka-qabashada Hore ee loogu talagalay dhallaanka iyo socod-baradka naafada ah iyo qoysaskooda

# Miyaad qabtaa wax **walaacyo ah oo ku saabsan korriinka ilmaha?**

Waalidiinta intooda badani waxay la yaabaan mararka qaarkood in ilmahoodu uu u kobcaayo una korayo sida carruurta kale ee ay isku da'da yihiin. Ilmo kasta si ka duwan ilmaha kale ayuu u koraa.

## Dhallaanku Ma Sugi Karaan Caawimaad.

Haddii korritaanka ama waxbarashada ilmaha ay ka hooseyso carruurta kale ee ay isku da'da yihiin, waxaa wanaagsan in la hubiyo sida ugu dhaqsaha badan ee suurtagalka ah. Isla sidaas oo kale waa run haddii ilmuhu qabo xaalad caafimaad oo daba-dheeraata. Carruur badan ayaan "korin" markay jirto dhibaato. Waxaa laga yaabaa inay u baahdaan adeegyo bulsheed iyo taageero dheeraad ah si ay ugu noolaadaan nolol caafimaad iyo guul leh.

**Dhammaan carruurtu waxay u koraan si kala duwan.**
Hoos waxaa ku qoran qaar ka mid ah hagayaasha si aad u aragto sida ilmahaagu u korayo:

### 0–1 Sanno

- ✓ Madaxa kor u qaada markuu afar bilood gaaro
- ✓ Walxaha soo qaada markuu lix bilood gaaro
- ✓ Ka jawaaba dhawaaqyada markuu lix bilood gaaro
- ✓ Sameeyaa qaar ka mid ah dhawaaqyada ay dadka kale sameeyaan markuu sagaal bilood gaaro
- ✓ Adeegsadaa alaabta guriga si uu u istaago markuu 12 bilood gaaro.

### 1–2 Sanno

- ✓ Qasada gacmaha & lugaha marka dharka loo xiraayo markuu 18 bilood gaaro
- ✓ Tilmaamo shayga uu isaga/iyada rabaan markay 18 bilood gaaraan
- ✓ Socda caawimaad la'aan markuu 18 bilood gaaro
- ✓ Dhaho laba kelmadood markuu 18 bilood gaaro
- ✓ Wax ku cabo koob markuu laba sanno gaaro
- ✓ Muujiya hal xubin oo jirka ah (indhaha, sanka) marka la weydiiyo markuu laba sanno gaaro

### 2–3 Sanno

- ✓ Ku hadla jumlado 2-3 kelmadood ah markuu saddex sanno garo
- ✓ Kora oo ka soo degga jaranjarooyinka iyadoo aan la kaalmayn markuu saddex sanno gaaro
- ✓ La ciyaara dadka waaweyn markuu saddex sanno gaaro
- ✓ Dharka iskaga siiba si iskiis ah markuu saddex sanno gaaro
- ✓ Dadka weydiiya waxoogaa su'aalo ah markuu saddex sanno gaaro
- ✓ Hadla si ay xubnaha aan qoyska ka tirsanayn u fahmaan kelmadihiisa intooda badan markuu saddex sanno gaaro

# Sidee ayay **Shabakadda Korriinka Hore u caawin kartaa?**

The Early Development Network (Shabakadda Korriinka Hore, EDN) waxay bixisaa adeegyo iyo taageerooyin la qaabeeyey iyadoo lagu salaynayo baahiyaha carruurta da'doodu u dhexeyso dhalashada ilaa saddex jir iyo qoysaskooda iyagoo aaminsan in waalidiintu ay garanayaan waxa u wanaagsan qoysaskooda. Adeegyadan waxaa loogu talagalay inay wax ka qabtaan waxa qoysasku u arkaan inay muhiim u yihiin ilmahooda iyo qoyskooda. EDN waxaa ka shaqeeya dad saaxiibtinimo leh, taageero leh oo dhageysta isla markaana ixtiraamo qoysaska. EDN waxay qoysaska sidoo kale ku xiri kartaa qoysaska kale oo soo maray mahadho tan la mid ah.

Hadafka Shabakadda Korriinka Hore waa inay u bixiso adeegyada la isku dubariday ee loogu talagalay qoysaska Nebraska sida ugu habboon ee suurtogalka ah. Barnaamijku waxa uu qoysaska ka caawiyaa in ay fahmaan naafonimada ubadkooda oo ay ka caawiyaan sidii ay wax uga qaban lahaayeen xaaladaha carqaladaynaya horumarka ubadka. Qoysasku waxay dooran karaan adeeg gaar ah ama dhammaan adeegyada. Qoysasku ayaa sidoo kale adeegyada diidi karaan wakhti kasta.

## Sidee ayaan ku ogaan karaa inuu ilmuhu u-qalmo?

Shabakadda Korriinka Hore waxay u adeegtaa carruurta laga bilaabo da'da dhalashada ilaa saddex jir iyo qoysaskooda. Ilmuhu wuxuu xaq u leeyahay adeegyada Shabakadda Korriinka Hore haddii isaga ama iyada aysan si caadi ah u korayn, ama laga helay xaalad caafimaad oo saamayn ku yeelan doonta korritaankiisa/eeda.

Aqoonsashada dib-u-dhacyada ama naafanimada noocaas ah waxaa inta badan ku lug leh qoyska iyo kooxda xirfadlayaasha ah. Si aad wax badan u ogaato wac:

**Nebraska CHILDFIND** lambarka 1-888-806-6287



# Maxaa dhaca **marka xiga?**

Gudbinta waxaa samayn kara qof kasta oo ka walaacsan korriinka ilmaha (tusaale ahaan xubin qoyska ka tirsan, bixiyaha daryeelka ilmaha, dhakhtarka, shaqaalaha bulsheed, ama adeeg bixiye kale). Waxaa la wici doonaa Isku-duwaha Adeegyada, kaas oo qoyska kula xiriiri doona toddobo maalmood gudahooda si uu u go'aamiyo inay danaynaayaan adeegyada Shabakada Korriinka Hore.

Marka la helo oggolaanshaha qoyska, Isku-duwaha Adeegyada ayaa u qabanqaabin doona qiimaynta lala samaynayo degmo-dugsiyeedka si loo go'aamiyo baahiyaha gaarka ah ee ilmaha iyo u qalmitaankiisa/eeda. Isku-duwaha Adeegyada ayaa qoyska ku xiri kara khayraadka bulsheed ka hor qiimaynta haddii loo baahdo. Hadduu ilmuhu xaq u yeesho, Isku-duwaha Adeegyada ayaa aqoonsan doona dad kale oo ka qayb qaadan kara kooxda si ay uga caawiyaan qoyska inay soo saaraan Individualized Family Service Plan (Qorshaha Adeegga Qoyska ee La Gaar Yeelay, IFSP), kaas oo dejiya hadafyada loogu talagalay ilmaha iyo qoyska ee tilmaamaya hawlaha iyo adeegyada loo baahan yahay si loo gaaro hadafyadaas. IFSP waxaa lagu dhammaystiri doonaa 45 maalmood gudahooda, si qoysku ugu helaan adeegyada Shabakadda Korriinka Hore sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah.



## Waa maxay sababta uu Isku-duwaha Adeegyada muhiim u yahay?

Maadaama qoysaska haysta carruurta naafada ah ay inta badan u baahan yihiin adeegyo badan oo kala duwan, Isku-duwaha Adeegyada ayaa muhiimad leh si uu ula shaqeeyo hay'adaha bixiya adeegyadan si loo hubiyo in ilnuhu iyo qoysku helaan caawimaada ay u baahan yihiin. Isku-duwaha Adeegyada wuxuu sidoo kale qoysaska u sheegaa wax ku saabsan adeegyada laga heli karo bulshada dhexdeeda, waxa uu hubiyaa in adeegyada loo gaarsiiyo si habsami leh oo habboon, wuxuuna qoysaska u sheegaa wax ku saabsan kooxaha u-doodista iyo taageerada.

Qoysasku waxay xaq u leeyihiin inay caawiyaan Isku-duwaha Adeegyada ilaa laga gaaro wakhtiga qiimaynta, iyo qiimaynta ka dib haddii la xaqiijiyo inuu ilmuhu naafo yahay.

# Maxay yihiin adeegyada **la bixiyo?**

Shabakadda Korriinka Hore waxa ay bixisa adeegyo udub-dhexaad u ah qoyska, oo ku salaysan baahiyaha gaarka ah ee ilmo iyo qoys kasta. Adeegyada laga yaabo in la siiyo carruurta iyo qoysaska waxaa ka mid ah, laakiin kuma xaddidna:

**Isku-dubbaridka adeegyada**
**Daaweynta hadalka/luuqada**
**Daaweynta jireed**
**Daaweynta shaqaynta jirka**
**Adeegyada cilmi-nafsiga**
**Qalabka tiknoolajiyadeed & adeegyada maqalka kaaba**
**Gaadiidka**
**Dareenka maqalka**
**Adeegyada aragga**
**Adeegyada nafaqada**
**Tababarka qoyska**

Adeegyada kale ayaa laga yaabaa in lagu bixiyo iyadoo lagu salaynayo baahiyaha iyo u-qalmitaanka ilmaha iyo qoyska.

# Xiriirada Waalidka ee PTI

Waalidiin badan oo caruurtooda loo aqoonsaday inay naafo yihiin ayaa waxay u arkaan inay ku faraxsan yihiin inay la hadlaan waalidiinta kale ee “halkaas joogay” waxayna ka caawin karaan qoyska inay la qabsadaan caqabadaha cusub ee ay wajahayaan. Iyadoo loo marayo PTI Nebraska (Parent Training & Information for Families with Children with Disabilities, Tababarka Waalidka & Macluumaadka loogu talagalay Qoysaska haysta Carruurta Naafada ah), qoysaska ama shaqaalaha khibradda leh waxay bixiyaan taageero fool-ka-fool ah waxayna ka jawaabaan su'aalaha oo sidoo kale waxay qoysaska ku xiraan khayraadka ama wakaalado gaar ah oo ka dhex jira bulshada. PTI Nebraska waxaa lagala xiriiri karaa lambarka **1-866-991-6713**.



## Waa maxay waxa dhacayo ka dib **markuu ilmuhu saddex jirsado?**

Qoysasku waxa laga yaabaa inay ku sii jiraan nidaamka Shabakadda Korriinka Hore ilaa Agoosto 31 ka kadib sannadka saddexaad ee ilmahooda haddii ay doortaan. Wakhtigaas ka bacdi, adeegyada waxbarashada waxaa siinaayo degmo-dugsiyeedka iyadoo lagu salaynayo baahiyaha lagu aqoonsaday Individual Education Plan (Qorshaha Waxbarashada ee La Gaar Yeelay, IEP). Haddii ilmaha/qoysku wali u baahan yahay adeegyo nooc kale ah, Isku-duwaha Adeegyada wuxuu qoyska ku xiri karaa barnaamijyada kale ee Nidaamka Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha iyo hay'adaha kale ee bulsheed ka hor inta qoysku aysan ka bixin nidaamka Shabakadda Korriinka Hore.

## Sidee ayay xubnaha **bulsheed u caawin karaan?**

Xusuusnow – dhallaanku ma sugi karaan caawimaada ay u baahan yihiin! Waxaa jira in ka badan 2,000 oo carruur ah oo ku nool gudaha Nebraska, oo da'doodu u dhexeeyso dhalashada ilaa saddex jir, oo adeeg ka hela Shabakadda Korriinka Hore. Haddana qaar ka mid ah carruurta xaqa u leh weli lama aqoonsan. Waxaad qayb ka noqon kartaa dadaalka bulshadu wado si loo ogaado carruurtan iyo in la ogeysiiyo waalidiinta iyo dadweynaha kaalmada la helayo iyadoo lo marayo Shabakadda Korriinka Hore.



### Waxaa jira qaabab badan oo lagu caawin karo:

- ✓ Awoowe/ayeeyo, bixiyaha daryeelka ilmaha, dhakhtarka, shaqaalaha bulsheed, ama deriska walaacsan oo yaqaano ilmaha ka faa'iideysan doona adeegyadan ayaa u soo gudbin kara Nebraska CHILDFIND ka dib marka uu helo oggolaanshaha qoyska.
- ✓ Adigoo ka dhigaya buug-yarahaan iyo agabyada kale ee macluumaadka ee ku saabsan Shabakadda Korriinka Hore kuwa laga heli karo bulshada dhexdeeda.
- ✓ Adigoo ku martiqaadaya shaqaalaha Shabakadda Korriinka Hore si ay u siiyaan macluumaadka iyo kaalmada farsamo ee ku saabsan adeegyada waalidiinta, bixiyeyaasha adeegga, dugsiyada, iyo hoggaamiyeyaasha bulshada.

Si aad u samayso tixraac, hel nuqullada buug-yarahan ama agabyada kale ee Shabakadda Korriinka Hore, ama si aad qof ugala hadasho wax ku saabsan Shabakadda Korriinka Hore, fadlan la xiriir:

**Nebraska CHILDFIND** lambarka 1-888-806-6287

## Hay'adaha Wada-Hoggaanka ah

**Waaxda Caafimaadka & Adeegyada Aadanaha ee Nebraska**
P.O. Box 95044
Lincoln, NE 68509-5044
402-471-9310

**Waaxda Waxbarashada ee Nebraska**
P.O. Box 94987
Lincoln, NE 68509-4987
402-471-2471

Shabakadda Korriinka Hore waa dadaal iskaashi oo ay wadaagaan hay'adaha wada-hoggaanka ah, Nebraska Department of Health and Human Services (Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Nebraska, DHHS) iyo Nebraska Department of Education (Waaxda Waxbarashada ee Nebraska, NDE). Kooxaha Qorsheynta ee Gobolka ee ku jira Gobolka oo dhan ayaa mas'uul ka ah caawimaada qorsheynta iyo hirgelinta ee Shabakadda Korriinka Hore ee bulshada deegaanka ama gobol kasta.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Shabakadda Korriinka Hore, oo ay ku jirto macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan xuquuqda carruurta iyo qoysaska ka qayb qaata adeegyada, ka eeg mareegta Shabakadda Korriinka Hore barta: **http://edn.ne.gov.**

Dokumeentiyo daabsacan ayaa laga codsan karaa iyadoo la wacayo **Nebraska CHILDFIND** lambarka 1-888-806-6287.

Si aad u hesho macluumaad ku saabsan barnaamijka ka jira deegaankaaga, ama si aad u samayso gudbin maxalli ah, wac: